

**GOLAHA ODAYAASHA
DHAQANKA
KOONFUR GALBEED
SOMALIA**



SOUTH-WEST STATE OF SOMALIA

**THE COUNCIL OF TRADITIONAL
ELDERS OF SOUTHWEST STATE
SOMALIA**

GODhKG/XG – 052/2017

Date: 06/11/2017

- KU: Guddoomiyaha Baarlamaanka Koonfur Galbeed Soomaaliya. – Baydhabo-
- KU: Golaha Aqalka sare Federaalka Soomaaliya. – Muqdisho-
- KU: Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya. – Muqdisho-
- KU: Wasaaradda arrimaha Gudaha Federaalka Soomaaliya. – Muqdisho-
- OG: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. – Muqdisho-
- OG: Ra'iisul Wasaaraha Dowladda Federaalka Soomaaliya. – Muqdisho-
- OG: Xubnaha Beesha Caalamka - Rugtooda-

Ujeedo: Go'aan Golaha Odayaasha Dhaqanka Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Waxaa Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed u qorsheysneyd in ay ka qabsoonto doorashada Madaxweynaha Koonfur Galbeed 17/11/2018. Doorashadani waa tii ugu horaysay ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed ka qabsoonta oo ay dooranayaan Madaxweynaha mudaneyaasha baarlamaanka Koonfur Galbeed, taasoo ka duwan tii ka horreysay oo ay doorteen madaxweynaha odayaasha dhaqanka iyo ergooyinkii ay soo xuleen.

Intaa ka dib, waxaa dhacday doorashadii la filaayay in ay qabsoonto 17ka Nofembar 2018 ay fara gelin qaawan ku soo qaaday Dowladda Federaalka Soomaaliya faragelintaas oo ah:

Musharraxiinta qaar ka mid ah in ay la safatay oo ay soo siisay lacag fara badan iyo baabuur aan xabbaddu Karin (armoured Vehicles), iyadoo si cad u diidday musharraxiin ka mid ah musharraxiinta in ay isa soo sharraxaan. Waxaa kaloo intaa sii dheer, xildhibaannadii koonfur Galbeed oo la filaayay in ay u caddaalad falaan musharraxiinta oo ay u daabushay magaalada Muqdisho

Sidoo kale, waxay lacagyow laaluush ah ay siisay xildhibaannadii halkan laga qaaday iyadoo xildhibaannadaas aan kor ku xusnay amar ku siisay in ay doortaan musharrax ay iyagu wataan. Sidaas daraaddeed, odayaasha dhaqanka oo ah marjaca Koonfur Galbeed Soomaaliya iyagoo cuskanaaya Qodobka 60aad faqrada C,D,G, ee dastuurka Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya waxay go'aan ku gaareen in dib loo dhigo doorashadii loo ballansanaa 17ka Nofembar 2018 sababaha kor ku

xusan awgood inta laga helaayo Jawi degan si simana fursadna uga heli karaan Musharaxiinta iyadoo la ilaalinaayo nabad gelyada iyo xasilloonida shacabka koonfur galbeed Soomaaliya. Haddiise aan sidaas la yeelin, wixii dhibaato ee ku yimaadda Koonfur Galbed waxaa dusha u ridan doona madaxda ugu saraysa Dowladda Federaalka Soomlaaiya.

Saxiixayaasha:

1. Malaaq Maxamed Yacquub Sheekh Deeroow
2. Malaaq Cali Malaaq Xasan Cali Qataar
3. Malaaq Muxuddiin Xaaji Aadan
4. Malaaq Maxamed Amiin Ibraahim
5. Malaaq Maxamed Xasan Barrow
6. Malaaq Xasan Shurre Maxamuud
7. Malaaq Sheekh Aamiin Sheekh C/Baari
8. Malaaq Guudoow Baaqaay
9. Malaaq Cabdiyeey Cali Ibraahim
10. Malaaq Warasme Xuseen Ibraahim
11. Malaaq Xasan Gaabe Xuseen
12. Malaaq Ibraahim Sheekh Salaad
13. Malaaq Suldaan Xeydar Suldaan Suufi Suldaan Munye
14. Suldaan Cusmaan Suldaan axmed Sheekh
15. Malaaq Yusuf Cabdi Aadan
16. Malaaq Nuur Shaakooy Jibriil
17. Malaaq Usmaaneey Cabdi Eenoow
18. Malaaq Cali Boor C/Nuur
19. Malaaq Aadan Tiiroow Cabdi
20. Malaaq Axmed Aadan Laamoow
21. Malaaq Maxamuud Maxamed Cabdi
22. Malaaq Cali C/raxmaan Shiino
23. Malaaq Ugaas Maxamed Ugaas
24. Malaaq Cali Macallin Cabdi
25. Malaaq Xasan Cumar Xasan
26. Malaaq Suldaan Maxamed Cusmaan Ooroow
27. Malaaq Ugaas Abuukar Isloow
28. Suldaan Ibraahim Cali Xaaji
29. Ugaas Sheekh Aadan Diiriye
30. Nabaddoon Awyare

(Handwritten signatures and names corresponding to the list above)

WARSAMI

Malaaq Maxamed Yacquub Sheekh Deerow
 Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Odayaasha Dhaqanka ahna
 Afhayeenka Golaha Odayaasha Dhaqanka K.G.S

